| جمهورية مصر العربية | ١٠ محرم ١٤٤٥هـ |
| --- | --- |
| وزارة الأوقاف | ٢٨ يوليو ٢٠٢٣م |

(١)

# QUR’AANKA KARIIMKA WAA KITAAB CAALAMKA NAXARIIS U AH

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

{ وَنُنَزِّلُ مِنَ الْقُرْآنِ مَا هُوَ شِفَاءٌ وَرَحْمَةٌ لِلْمُؤْمِنِينَ }

(**Waxaana soo dajinaynaa Quraanka Isagoo caafimaad iyo Naxariis u ah Mu’miniinta**,)

Wuxuu leeyahay Alle (SW):

{وَهَذَا كِتَابٌ أَنْزَلْنَاهُ مُبَارَكٌ فَاتَّبِعُوهُ وَاتَّقُوا لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ}

**(Kanna (Quraanku) waa Kitaab aan soo Dejinnay oo Barkaysan, ee Raaca Dhawrsadana in laydiin Naxariisto)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Quraanka kariimka waa xariggii Alle oo adag waana digriga xigmadda leg, qofkii qaato run buu sheegayaa, qofkii ku xukumana cadaalad buu sameynayaa, qofkii qabsadana waxaa lagu hanuuninayaa waddo toosan, culimada kama dhergaan, arrimihiisa cajiibka ahna ma dhammaadaan, xumaanna ma timaado hortiisa iyo gadaashiisaba, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{إِنَّهُ لَقُرْآنٌ كَرِيمٌ * فِي كِتَابٍ مَكْنُونٍ * لَا يَمَسُّهُ إِلَّا الْمُطَهَّرُونَ * تَنْزِيلٌ مِنْ رَبِّ الْعَالَمِينَ}،

(**Quraanku waa shay sharaf leh * Wuxuuna ku sugan yahay Kitaab la dhawray * Mana taabto Ruuxan Daahir ahayn * Waxaana soo dajiyay Eebaha Caalamka**)

Wuxuu leeyahay (SW):

**{وَإِنَّهُ لَكِتَابٌ عَزِيزٌ * لَّا يَأْتِيهِ الْبَاطِلُ مِن بَيْنِ يَدَيْهِ وَلَا مِنْ خَلْفِهِ تَنزِيلٌ مِّنْ حَكِيمٍ حَمِيد}.**

**(waana Kitaab qaali ah * Mana timaado xumaan hortiisa iyo gadaashiisa, waana soo dajinta Eebaha falka san ee la mahdiyo.).**

Quraanka kariimka waa kitaab caalamka naxariis u ah, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

**{يَا أَيُّهَا النَّاسُ قَدْ جَاءَتْكُمْ مَوْعِظَةٌ مِنْ رَبِّكُمْ وَشِفَاءٌ لِمَا فِي الصُّدُورِ وَهُدًى وَرَحْمَةٌ لِلْمُؤْمِنِينَ * قُلْ بِفَضْلِ اللهِ وَبِرَحْمَتِهِ فَبِذَلِكَ فَلْيَفْرَحُوا هُوَ خَيْرٌ مِمَّا يَجْمَعُونَ}،**

**(Dadow waxaa idiin kaga timid Eebihiin Waano iyo Caafimaadka waxa Laabta ku sugan iyo Hanuun iyo naxariista Mu'miniinta)**

Wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَنزلْنَا عَلَيْكَ الْكِتَابَ تِبْيَانًا لِكُلِّ شَيْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً وَبُشْرَى لِلْمُسْلِمِينَ}،**

**(Waxaana kugu dajinnay Kitaab oo ah Caddaynta wax kasta iyo hanuun iyo Naxariis iyo bishaarada dadka muslimiinta ah).**

Wuxuu leeyahay Alle:

**{تِلْكَ آيَاتُ الْكِتَابِ الْحَكِيمِ * هُدًى وَرَحْمَةً لِلْمُحْسِنِينَ}،**

**(Taas waa aayaadka Kitaabka (Quraanka) xigmada leh * waana hanuunka iyo naxariista samafalayaasha.)**

Wuxuu leeyahay Allaha sare:

**{وَلَقَدْ جِئْنَاهُمْ بِكِتَابٍ فَصَّلْنَاهُ عَلَى عِلْمٍ هُدًى وَرَحْمَةً لِقَوْمٍ يُؤْمِنُونَ}.**

**(Dhab ahaan baannu ugula Nimid Kitaab Aannu Caddaynay Annagoo ku Cilmi leh, Isagoo Hanuun iyo Naxariis u ah Ciddi Rumayn).**

Maaddada raxma qur’aanka waxay kusoo aroortay in ka badan labo boqol jeer, wuxuu caddeeyay quraanka weyn in naxariista ay tahay sifo ka mid ah sifooyinka Alle (cazza wa jalla) wuxuu leeyahay Alle:

**{وَرَحمَتِي وَسِعَتْ كُلَّ شَيْءٍ}،**

**(Naxariistayduna waxay u Waasac Noqotay wax kasta)** Wuxuu leeyahay (SW):

**{وَرَبُّكَ الغَنِيُّ ذُو الرَّحْمَةِ}،**

**(Eebhaaana waa Hodan Naxriis badan,)**
Wuxuu leeyahay Allaha sare:

**{وَرَحْمَتُ رَبِّكَ خَيْرٌ مِمَّا يَجْمَعُونَ}،**

**(Naxariista Eebahaa yaa ka khayr badan waxay kulmin)** Wuxuu leeyahaya Alle (SW):

**{كَتَبَ رَبُّكُمْ عَلَى نَفْسِهِ الرَّحْمَةَ}.**

**(Wuxuu Eebe Isasaaray Naxariis)**

Qofkii fiirfiiriya qur’aanka weyn wuxuu ogaanayaa naxariista Alle (cazza wa jalla) uu u naxariisanayo caalamka, illeen wuxuu abuuray habeenka iyo maalinta, naxariis uu u naxariisanayo awgeed kahlqigiisa oo dhan si ay u nastaan habeenkii, oo maalintiina ay u shaqaystaan oo arsaaq ay u helaan oo koonka ay u camiraan, sidoo kale Alle roobka naxariis awgeed ayuu u keenay wuxuu leeyahaya Alle (SW):

{وَمِنْ رَحْمَتِهِ جَعَلَ لَكُمُ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ لِتَسْكُنُوا فِيهِ وَلِتَبْتَغُوا مِنْ فَضْلِهِ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ}،

**(Naxariistiisa waxaa ka mid ah inuu idiin yeelay Habeen iyo Dharaarba inaad Xasishaan dhexdiisa Dalabtaanna Fadligiisa iyo inaad ku Shugridaan.)** wuxuu leeyahay (SW):

{وَهُوَ الَّذِي يُرْسِلُ الرِّيَاحَ بُشْرًا بَيْنَ يَدَيْ رَحْمَتِهِ حَتَّى إِذَا أَقَلَّتْ سَحَابًا ثِقَالًا سُقْنَاهُ لِبَلَدٍ مَيِّتٍ فَأَنْزَلْنَا بِهِ الْمَاءَ فَأَخْرَجْنَا بِهِ مِنْ كُلِّ الثَّمَرَاتِ كَذَلِكَ نُخْرِجُ الْمَوْتَى لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ}.

**(Eebe waa kan u dira Dabaysha Bishaaro Naxariistiisa (Roobka) Hortiisa markay Xambaarto Daruur Culusna waxaan u Kaxaynaa Dhul Dhintay (Abaar) waxaana ku Dejinaa (Shubnaa) Biyaha, waxaana ku soo Bixinaa wixii Dhintay inaad Xussusataan)**

Wuxuu caddeeyay qur'aanka kariimka in Allaha xaqqa ah (SW) uu soo diray rusul kutubna soo dejiyay naxariis uu u naxariisanayo caalamka awgeed, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

{أَوْ تَقُولُوا لَوْ أَنَّا أُنْزِلَ عَلَيْنَا الْكِتَابُ لَكُنَّا أَهْدَى مِنْهُمْ فَقَدْ جَاءَكُمْ بَيِّنَةٌ مِنْ رَبِّكُمْ وَهُدًى وَرَحْمَةٌ}،

**(Ama aydaan dhihin haddii Nalagu soo Dejiyo Kitaab waxaan ahaan lahayn kuwo ka hanuunsan iyaga, waxaa idiinka yimid Xujo (Cad) xagga Eebihiin, iyo Hanuun, iyo Naxariis)**

Wuxuu ku leeyahaya Alle midka lagu khatimay nabiyadiisa iyo rusushiisa (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahatee):

{وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا رَحْمَةً لِلْعَالَمِينَ}،

**(Kumana aanaan Dirin Naxariista Caalamka adoo ah Mooyee)**

Wuxuu leeyahay:

{لَقَدْ جَاءَكُمْ رَسُولٌ مِنْ أَنْفُسِكُمْ عَزِيزٌ عَلَيْهِ مَا عَنِتُّمْ حَرِيصٌ عَلَيْكُمْ بِالْمُؤْمِنِينَ رَءُوفٌ رَحِيمٌ}.

**(Waxaa idiin yimid Rasuul idinka mida oyna ku darantahay waxa idin dhiba, idiin kuna dadaali, una turid iyo naxariis badan Mu'miniinta)**

Sidoo kale Allaha xaqqa ah wuxuu ugu yeeray quraanka kariimka dhexdiisa dadka inay rajeeyaan naxariistiisa, wuxuu u caddeeyay in naxariistiisa ay u dhowdahay dadka wanaagga sameeyo iyo dadka toosan, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

{قُلْ يَا عِبَادِيَ الَّذِينَ أَسْرَفُوا عَلَى أَنْفُسِهِمْ لا تَقْنَطُوا مِنْ رَحْمَةِ اللهِ إِنَّ اللهَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ جَمِيعًا إِنَّهُ هُوَ الغَفُورُ الرَّحِيمُ}،

**(Dheh (Nabiyow) addoomadayda ku xadgudbay naftoodow ha ka quusanina naxariista Alle, Ilaahay ayaa dhaafa danbiyada dhamaantooda, waana dambi dhaafbadane oo naxariis badane ah)**

Wuxuu leeyahay Alle:

{إِنَّ رَحْمَتَ اللهِ قَرِيبٌ مِنَ المُحْسِنِينَ}.

**(Naxariista Eebana waxay u Dhawdahay kuwa Samaha Fala)**

***

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay anbiyada iyo rususha oo ah sayidkeena Muxammad sidoo kale nabadgalyo korkooda ha ahaato ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

Waxaan shaki ku jirin mu'minka dhabta ah inuu yahay kan ku dhaqma akhlaaqda qur'aanka kariimka oo Alle usoo dajiyay naxariis caalamka uu ugu naxariisanayo awgeed, iyo inuu ku dhaqmo aadaabta nabiga weyn oo Alle usoo diray asoo caalamka ugu naxariisanayo,

wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(الرَّاحِمُونَ يَرْحَمُهُمْ الرَّحْمَنُ، ارْحَمُوا مَنْ فِي الْأَرْضِ يَرْحَمْكُمْ مَنْ فِي السَّمَاءِ)،

**(Naxariisteyaasha raxmaanka ayaa u naxariista, ee u naxariista kan dhulka ku sugan ha idin naxariistee kan cirka jira)**

Wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(جَعَلَ اللَّهُ الرَّحْمَةَ مِائَةَ جُزْءٍ، فَأَمْسَكَ عِنْدَهُ تِسْعَةً وَتِسْعِينَ جُزْءًا وَأَنْزَلَ فِي الْأَرْضِ جُزْءًا وَاحِدًا؛ فَمِنْ ذَلِكَ الْجُزْءِ يَتَرَاحَمُ الْخَلْقُ، حَتَّى تَرْفَعَ الْفَرَسُ حَافِرَهَا عَنْ وَلَدِهَا خَشْيَةَ أَنْ تُصِيبَهُ)،

(**Alle naxariista wuxuu ka dhigay boqol qeyb, agtiisa wuxuu ku reebay sagaashan iyo sagaal qeyb, wuxuu dhulka usoo dejiyay hal qeyb, qeybtaas ayay khalqiga isugu naxariisanayaan, ilaa ay farasta qoobkeeda kor kaga qaaddo ilmaheeda iyadoo ka baqayso inay wax gaarsiiso**)

Markuu rati dhawaaqay oo ku ilmeeyay nabigeena hortiisa (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee wuxuu yiri: :

(لِمَنْ هَذَا الجَمَلُ؟) فجاء فتى من الأنصار فقال: لي، يا رسول الله، فقال له (صلى الله عليه وسلم): (أَفَلَا تَتَّقِي اللَّهَ فِي هَذِهِ الْبَهِيمَةِ الَّتِي مَلَّكَكَ اللَّهُ إِيَّاهَا؟ فَإِنَّهُ شَكَا إِلَيَّ أَنَّكَ تُجِيعُهُ وَتُدْئِبُهُ).

**(yaa iska leh ratigan?) waxaa yimid wiil reer asaar ah wuxuu yiri: anaa iska leh rasuulkii allow, wuxuu ku yiri (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee): ( miyaadan Alle uga baqaynin xoolahan oo Ilaahay ku siiyay? Wuxuu ii sheegtay inaad gaajo ku disho oona aad shaqo ku dhibto).**

Dadka oo dhan maxaa uga baahi badan inay ku dhaqmaan akhlaaqda qur'aanka weyn, kitaabka naxariista iyo nabadda iyo nabagalyada, waxaan kusoo khatimanynaa labo kalmadood mid waxay ku wajahan

tahay dadka quraanka yaqaan midda kalana waxay ku wajahan tahay dadka caqliga leh ee caalamka ku nool waxaan leenahay dadka quraanka ehelka u ahow ku qurxiya codadkiina qur'aanka maqashiiya dunidoo dhan, dadka qur'aanka ehelka u ahow ku qurxiya qur'aanka akhlaaqdiina fiican, kana dhiga jawaabta aad siinaysaa kuwa aqoonta aan lahayn in quraanka kariimka aad ku dadaashaan akhris iyo xusidba iyo barasho iyo fahan iyo ku camalfal, ilaahayow qofkii kitaabkaaga xumaan la doono dhagartiisa luguntiisa ugu celi kana dhig qorshayntiisa burburkiisa layaabka awooddadada naga tus.. kana dhig mid uu ku cibraqaato qofkii cibraqaadanayo.

Waxaan ku leenahay kuwa caqliga leh ee ku nool dunida caalamka uma adkaysan karo dagaallo diimeed iyadoo ay usii dheer yihiin dagaalladan hadda taagan, ee ku degdega in layska tuuro nacaybka diimeedka intaysan arrimaha faraha ka bixin, xagjirnimada waxay keenaysaa xagjirnimo lid ku ah, arrinta xadka ayay ka baxday waxaana keenay taas xadgudubka doqomada qaar iyo oggolaanshaha loo oggolaaday wixii keenaya nacaybka diimeed oo duminaya islanoolaanshaha, ee halaga gaaro halaga gaaro.

Waxaan shaki ku jirin in dhammaan muslimiinta oo diintooda u qiiroonaya waxaa dhibayao qofkii ku xadgudbayo nabigooda ama kitaabka rabbigooda si kaste ay isu dejiyaan dadka caqliga leh oo ay u sabraan oo ay is reebaan waxaa imaanaya waqti ay waxaan oo dhan dhammaanayaan oo arrinta dadka caqliga leh faraha uga baxayso oo ay keenayso fidnooyin sida habeenka mugdiga ah oo ciribtooda uusan ogeyn qof aan Alle ahayn.

**Allow qur’aanka kariimka nagu anfac**